

# TALLALADA IYO XOOJIYEYAASHA COVID-19

## EE GURIGA LAYSKUGU KEENO

Ma kugu adagtahay adiga ama qof aad daryeesho inaad guriga ka baxdaan? U qorshee tallaalka COVID-19 ee guriga layskugu keena ahna BILAASHKA!

### Yaa u qalma tallaalka guriga layskugu keeno?

#### Qof walba oo jira 6 bilood ama wixii ka weyn kaas oo:

- U qalma tallaalka taxanaha koobaad ama irbad xoojiso ah **iyo**
- Ma qabtaa jirro ba'an ama joogto ah, dhaqdhaqaaq xaddidan, dhaawac, naafo korriin, ama xaalad caafimaad maskaxeed oo adkeynaysa inaad guriga ka baxdo.

Dhammaan tallaalkada aasaasiga ah iyo xoojiyeyaasha loogu talagalay tallalka guriga dhexdiisa waa BILAASH iyadoon loo eegin caymiska, jinsiyada, ama xaalada soogalootinimada.

### Sideen u codsan karaa ballanta tallaalka guriga layskugu keeno?

- Wac **206-848-0243**, maalmaha shaqada, laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 5:30 galabnimo (sheeg luqadda aad doorbidayso marka lagaa qabto telefonka).
- Haddii aad naafo tahay oo aad u baahan tahay hoy, iimayl u dir **publichealthaccommodations@kingcounty.gov** ama wac **206-848-0243** ( noo sheeg waxaad u baahan tahay marka lagaa qabto telefonka).

Updated: 03/29/2023